WAXAA HADDA DILAACDAY JADEECO

Jadeecadu waa cudur aad u faafa oo uu keeno fayras. Waxay noqon kartaa mid khatar ah, gaar ahaan dhallaanka iyo ilmaha yaryar. Ka ilaali qoyskaaga iyo bulshadaada.

Jadeecadu waxay ku faaftaa hawada marka qof la jirran uu qufaco ama hindhiso. Fayrasku wuxuu hawada ku jiri karaa muddo 2 saacadood ah kadib marka qofka qaba jadeecada uu ka tago goobta. Waa mid si aad ah u faafta oo ku dhawaad 9 ka mid ah 10-ki qof oo u dhawaada qof qaba jadeecada oo aan qabin difaac tallaal ay iyaguna ku dhacdo.

Calaamadaha jadeecada waxay ku soo muuqdaan 7 ilaa 14 maalmood kadib marka la qaado fayraska. Calaamadaha guud ee jadeecada waxaa ka mid ah:

Qandho badan (waxay ka sarrayn kartaa 104°F)

Qufac

Biyo ka socdo sanka

Indho cas iyo/ama biyo leh

Finan (waxay soo baxaan 3-5 maalmood kadib marka calaamadaha ay bilowdaan)

Jadeecadu waxay keeni kartaa dhibaatooyin caafimaad oo aad u daran, oo ay ku jiraan:

Burkiito

Bararka maskaxda (maskax-barar)

Xitaa waxaa suurtagal ah dhimasho

Habka ugu wanaagsan ee la isaga difaaco jadeecada ...

waa tallaalka jadeecada, qaamow-qanshiirka, iyo rubella (MMR). Marnaba ma ahan habsan in la qaato tallaalka. Tallaalku wuxuu gacan ka gaystaa difaacaaga, difaaca dadka kugu xeeran, iyo bulshadaada. Haddii aadan tallaal qabin, tixgeli inaad guriga joogto ama inaad ka fogaato meelaha dadka badani ay isugu yimaadaan ilaa inta xaaladaha jadeecada ee aagga ay hoos u dhacayaan, gaar ahaan si aad u ilaaliso dadka ka-tirsan qoyskaaga ee aadka ula xanuusan kara.

Haddii aad u malaynayso in adiga ama qof ka mid ah qoyskaaga uu qabo jadeeco, ka fogee dadka kale una wac daryeel bixiye caafimaad, daryeel degdeg ah, ama qolka xaaladaha degdegga ah.

U DIYAARGAROW JADEECADA
cdc.gov/measles

CDC